

## Waxaa la fududeeyey la xiriirka hay'adka kala duwan

Ma u baahan tahay caawinaad si aad ula xiriirtid hay'adka kala duwan, si aad shaqo u hesho ama qaab kale ee aad masruufkaaga kusoo gacan gelin kartid? Kooxda iskuxirka ayaa kaa caawineysa inaad hesho jidka xiriirka saxda ah.

Kolkii aad xidhiidh lasoo samaysid kooxda iskuxirka waxaa lagugu casumayaa shir aad la yeelato qof ka mid ah kooxda. Markii aad sheegtid waxa aad dooneysid in lagaa caawino, waxaan talo kugu siineynaa meeshii aad la xiriiri lahayd, waxaanu kaloo kusiineynaa kaalmo si aad u hesho xiriirkaas saxda ah.

### Yaa ka mid ah kooxda iskuxirka

Waxaa ku caawin kara kooxda iskuxirka mar haddii aad tahay qof u dhashay degmada Örebro, da'daaduna tahay inta u dhexaysa 16 ilaa 65 jir aadna u baahan tahay in la isku duwo kaalmada ka timaada hay'ada caymiska, shaqada, gobolka Örebro iyo degmada Örebro.

Caawinaad weydiisashada kooxda xiriirku waa lacag la'aan.

### Sidaan yeel si aad caawinaad u weydiisatid kooxda xiriirka

Buuxi foomka dalbashada ee ku jira hoyga degmada ee ([orebro.se/samverkansteamet](http://orebro.se/samverkansteamet)). Markii aad soo dirto codsiga, waxaa kula soo xiriiri doona qof ka socda kooxda xiriirka si aad u wada go'aansataan wakhtiga kulanka kowaad.

Adiga ama qof qaraabo ah ayaa sidoo kale la xiriiri kara kooxda xiriirka. Waa la waci karaa ama warqad ayaa loogu diri karaa dhinaca internetka ama waxaa la soo booqan karaa xafiiska adeega arrimaha bulshada ee degmada (servicecenter).

Waxaa kaloo fikirka inaad nala soo xiriirto kuusoo jeedin kara gacanhayaha hay'ada caymiska, shaqada, gobolka Örebro iyo degmada Örebro.

### Waa kuwee dadka ka tirsan kooxda iskuxirka?

Dadkayaga ka tirsan ama ka shaqeeya kooxdaan iskuxirka waxaa aan u shaqaynaa degmada Örebro, hay'ada shaqada ama midda caymiska, tusaale ahaan sida la taliye dhinaca shaqada ama gacanhaye. Waxaan aad uga warhaynaa kaalmada la heli karo, waxaanuna xiriir soo jireen ah la leenahay qaybta caafimaadka ee arrimaha cilmi-nafsiga iyo cudurrada madaxa iyo weliba guud ahaan caafimaadka.

Haddaan nahay dadka kooxdaan ka howlgala waxaan ku dadaaleynaa inaan sida ugu wanaagsan kuu garab istaagno, waxaana nagu waajib ah in aan la sheegin waxii aan ku wada hadalay. Taas macnaheedu waxaa weeye in aan cid kale ogaan doonin waxii aad kalsooni noogu sheegtay.

### Nala soo xiriir

Sanduuqa boostada dhinaca internetka: [samverkansteamet@orebro.se](mailto:samverkansteamet@orebro.se)

Taleefoon: 019-21 10 00

Hoyga degmada: [orebro.se/samverkansteamet](http://orebro.se/samverkansteamet)

Somaliska